




(utan bilder)

✎ Rukia Nantale
🔗 Benjamin Mitchley
📄 Abdi Muse
😊 somaliska
|| nivå 5



Simbegwire



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Simbegwire

Skriven av: Rukia Nantale

Illustrerad av: Benjamin Mitchley

Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<http://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons


[Erkännande 3.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv>




Markay Simbegwire hooyadeed dhimatay waxay ahayd mid aad u murugaysan. Simbegwire aabaheed waxuu sameeyay sida ugu fiican oo daryeelka gabadhiisa. Si tartiib ah waxay barten in ay darreemaan farxad markale, la aanta simbegwire hooyadeed. Subax kasta waa ay fadhiistan kana wada hadli jireen wax ku saabsan malinta ka horayso. Fiid kasto waxay wada samayn jirreen cashada. Kadib waa ay dhaqaan maacuunta, aabaha Simbegwire waxuu ka caawin jiray shaqada guriga.

Halmaaln aabihii Simbegwire waxuu yimid guriga si kadib dhacsan sidii caadada u ahayd. "Xagee baad jooftaa ilmahaiga" wuu u wacay. Simbegwire waxa ay ku oraday aabahood. Waa ay istagtay si dhaqaaq la'aan ah markay aragtay in uu haysto gacanta haweeney. "Waxaan rabaa in aad lakulantu qof khaas ah, ilmahaigow. Tani waa Anita," ayuu yidhi! asagoo dhoolacadaynayo.






“Halloo Simbegwire, aabaha aya ii sheegay waxyaabo badan oo kugu saabsan.” Ayay tidhii Anita. Laakiin ma aynan dhoolacadaynin mana ay qaadin gacanta gabadha. Simbegwire aabaheed waxuu ahaa mid aad u faraxsan oo xiiseynaya. Waxuu ka hadlay sida sedexdooda ay u wada noolaan doonan, iyo sida wanaagsanaan ay noloshooda ahaan doonto. “Ilmahayga, waxaan rajaynayaa in aad aqbali doonto Anita sidii hooyadaa o kale,” ayuu yidhi.





Toddobaadkii kuxigay, Anita ayaa ku martiqaaday Simbegwire, ilmo eedadeed iyo eedadeed ba guriga iyo cunto. Maxay cunto ahayd! Anita waxay diyaarisay dhamaan cuntooyinki ay ugu jeclayd Simbegwire, qof kastana wuu cunay ilaa ay ka dhargaan. Kadibna carruurtu waa ay ciyaarayeen halka dadka waawayna sheekaysteen. Simbegwire waxay dareentay farxad iyo geesinimo. Waxay go'aansatay in si dhakhso, oo dhakhso ah, ay ku noqon doonto guriga si ay ula noolaato aabaheed iyo eedadeed/aayadeed.

Nolosh Simbegwire way isbadashay. Dambe uma aysan hellin waqti si ay arroorti ula fadhiiisato aabahood. Anita ayaa siisay shaqooyin badan oo guriga kamid ah, taas oo ka dhigtay mid aad uga daallisa ka shaqaynta shaqada iskuulka xilliga fidkii. Waxay si toos ah u aaday sarrirta cashada kadib. Raaxada kali ah ay haysatay waxuu aha busthi!! midabaysnaa ooy hooyadeed siisay. Simbegwire aabahood uma usan muuqan mid ogaaday in gabadhiiisa aysan faraxsanayn.




Aabahood ayaa maalin walba soo booqan jiray. Ugu dambeyntii, wuxuu la yimid Anita. Waxay laacday Simbegwire gacanteedi. "Aad ayaan uga xumahay yarrisey, waan galdamay," ayay ku ooyday. "Ma !! ogo!aaneynaa in aan mar kale isku daydo?" Simbegwire waxay eegtay aabahood iyo wajigiisa welwelsan. Kadibna si tartiib ah ayay horay u socotay waxayna gacmahooda ku wareejiisay Anita.







Dhowr bilood ka dib, Simbegwire aabaheed ayaa u sheegay ayaga in uu ahaan doono mid ka maqan guriga cabaar. “Waa inaan u safraa shaqadeyda,” ayuu yiri. “Laakiin waan ogahay in aad is illaalin doontaan.” Wajiga Simbegwire ayaa qushuucay, laakiin aabaheed ma ogaanin. Anita ma sheegin waxbo. Mana aysan faraxsaneyn.




Simbegwire waxay la ciyaaraysay ilma eedadeed markii ay ka aragtay aabaheed meel fog. Waxay ka cabsatay inuu xanaaqsanyahay, sidaa darteed waxay ku oraday guriga dhexdiisa si ay isku qariso. Laakiin aabbeheed baa u yimid waxuuna ku yidhi, “Simbegwire, waxaad u heshay naftaada hooyo kaamil ah. Taasoo ku jecel kuna fahmayso. Waan kugu faanaa waana ku jeclahay.” Waxay ku heshiiyeen in Simbegwire ay la joogi doonto eedadeed inta ay rabto.




Arrimaha way ku sii xumaadeen Simbegwire.
Hadaysan dhamaynin shaqada ama aay cabato,
Anita ayaa kudhufan. Xilliga cashada, haweenayda
aya cuntay inta badan cuntada, ayadoo ureebayso
Simbegwire waxyaabaha haraaga ah. Habbéen
kasto Simbegwire ooyinta ayay ku seexan jirtay,
ayaddoo bustihii hooyadeed hab siineyso.




Markii Simbegwire aabheed ku soo laabtay guriga,
wuxuu arkay goikheedii oo madhan. "Maxaa dhacay,
Anita?" wuxuu u waydiiyay si adag. Haweenaydi
waxay u sharaxday in Simbegwire ay carrartay.
"Waxaan rabay in ay iixtiraamto," ayay tidhi.
"Laakiin malaha waxaan ahaa mid ugu ad
adag." Simbegwire aabheed ayaa ka tagay guriga
waxuuna aaday jahadii dooxada. Wuxuu socday
illaa iyo tuuladii walaashii bal si uu u ogaado haddii
ay aragtay Simbegwire




Hal subax, Simbegwire ayaa ku daahday kasoo kiicida sariirta. "Gabadhaadan caajislayda ah!" Anita ku dhawaaqday. Waxaay simbegwire kasoo jiiday sariirtii. Bustihii qaaliga ahaa waxaa qabsaday musbaar, labo ayuu na u kala jeexay.



Simbegwire eedadeed ayaa u qaaday ilmihi gurigeeda. Waxay siisay simbegwire cunto diiran, waxa ayna ku jiiday sariir ayadoo haysata bustihii hooyadeeda. Habeenkaas, Simbegwire waa ay ooyday sideey ugu seexatay sariirta. Laakiin waxa ay ahayd ilin farxadeed. Waxay ogaatay in eedadeed illaalin doonto ayada.




Simbegwire aad bay u xanaaqday. Waxay go'aansatay inay ka cararto guriga. Waxay qaadatay gogti!! bustaha hooyadeed, waxay xiratay xogaa cunto ah, waxayna ka tagtay guriga. Waxay raacday wadadii aabahood maray.



Naagtan waxay kor u eegtey geedkii gudihiiisa. Markay aragtay gabadha iyo gogti! bustaha midabka leh, waxay ku ooyday "Simbegwire, imih!! walaalkay!" Dumarkii kale waxay joojiyeen dhaqisti! waxayna caawiyeen Simbegwire si ay uga soo dagato geedka. Edeadeed ayaa hab siiisay gabadhi! yarayd, waxayna isku dayday inay dajiso.



Markii ay fiidkii tahay, waxay kortay geed dheer oo u dhow doxada waxayna nafteeda sariir uga samaysay laamaha. Sidaasey u seexatay, way heestay: "Hooyo, Hooyo, Hooyo, waad iga tagtay, waad iga tagtay oo mana aadan soo laaban, Aabbo ima jeclo. Hooyo, goormad dib u soo noqon, waad iga tagtay."



Subbaxdii xigtay, Simbegwire waxay heetsay heesti markale. Markay dumarku yimaadeen doxada si ay ugu dhaqdaan dharkooda, waxay maqleen hees murugo ah oo ka imaanayso geedka dheer. Waxay u maleeyeen in ay ahayd dabeysha oo kaliya oo lulaayso caleemaha, waxayna sii wateen shaqadoodi. Laakiin mid ka mid ah haweenka ayaa si taxaddar leh u dhegaystay heesta.